



SOMALISK

# 10 talo uu ku socda bukaanka

Naga caawi sidii aan shaqadayada si fiican ugu qaban lahayn

## 1. Warbixin iska bixi:

- Turjubaan ma u baahan tahay?
- Daawo ma qaadataa?
- Daaweyn sidee ah ayaa kuu socota?.
- Maxaad kaloo samaysaa si aad caafimaadkaaga sare ugu qaaddo?

## 2. Na weydii ilaa intaad ka fahmayso

- Ha ka cabsoon inaad dhawr jeer su'aal dhiibato
- Qoro warbixinta lagu siinayo iyo su'aalaha aad dooneyso inaad dhiibato

## 3. Hubi in magucu kaagi yahay

- Hubi in warqadda iyo jijinta gacanta lagu xirto uu magacaaga ku qoran yahay
- Hubi in magacaaga iyo taariikhdaada dhalashada la hubiyo marka la qaadayo tijaabooyin iyo baaritaanno

## 4. Tayada su'aal ka dhiibo

- Yaa mas'uul kaa ah?
- Khibrad nooc ee ah ayay kuwa mas'uulka kaa ah u leeyihiin cudurkaaga?
- Weydii qofka ku qalaya oo qoro

## 5. Koontarool daawada

- Ma taadii baa?
- Waa maxay sababta aad u qaadanayso?
- Sidee ayay u shaqaysaa?
- Ma goojo sax ah baa?

## 6. Qaraabadu way ku caawin karaan

- Qoyska ayaa kuu hadli kara oo arrintaada ka hadli kara marka aadan adigu taa tabar u haynin
- Qoyska warbixin waa la siin karaa, wayna kula joogi karaan haddii aad doonaysid

## 7. Ogow waxa kaa khaldan

- Baro cudurka lagugu sheegay
- Weydii baaritaannada iyo daaweynta
- Haddii lagu qalayo dhakhtarka ka codso inuu jirkaaga meesha la qalayo qalin ku muujiyo

## 8. Sheeg haddii uu xanuun ama dhib ku hayo

- Haddii loo baahdana ku celi
- Haddii loo baahdo codso in lagu qoro qoraalka/diiwaanka

## 9. Maxaa dhacaya markaad isbataalka ka soo baxdo kaddib?

- Xanuunno iyo dhibaato sidee ah ayaa soo kordhi kara?
- Wax miyaad ka beddelaysaa raashinka?
- In intee dhan ayaad firfircoonaan kartaa?

## 10. Haddii gargaar caafimaad oo degdeg ah loo baahdo:

- Yaad la xiriiyaa? Dhakhtar, xarunta dhakhaatiirta kaltanka leh (legevakt) mise isbataal?
- Warbixin sidee ah ayay u baahan yihiin markaad la xiriirto?